

Marka hirgelinta sharciga timaado:

- Is xassili, adiga oo raaca tilmaamaha soo socda
- Hoos u tuur waxyaabaha aad gacanta ku haaysid (sida boorsooyinka, jaakooyinka)
- Kor u taag gacmaha iyo fiddi faraha
- Ha la arko gacmahaada mar kasta
- Iska ilaali in aad dhakhso u dhaqaaqdid dhanka saraakiisha, sida in aad iyaga qabsatid si aad u heshid ammaan
- Iska ilaali in aad farta ku fiiqidid, in aad ooyisid ama qeylisid.
- Ha weydiinin su'aalo marka aad baxsaneysid

Macluumaadka loo baahan yahay in la siiyo hawlaha 911:

- Meesha uu ku sugan yahay toogtaha firfircoon.
- Tirada toogteyaasha
- Sifeynta jirka toogteyaasha
- Tirada iyo nooca hubka toogtaha haysto.
- Tirada dhibaneyaasha suurtoogalka ah ee ku sugan goobta

Su'aalaha ama kaalmada dheeraadka ah, la xariir:

Madaxdaada hirgelinta sharciga deegaanka ama xafiiska Laanta FBI:



Department of Homeland Security
3801 Nebraska Ave, NW
Washington, DC 20528



DHACDADA TOOGTAHA FIRFIRCOON

TILMAANTA TIXRAACA DEGDEGGA

Toogtaha firfircoon” waa qof ka qeybqaata dilka ama iskudaya in uu dad ku dilo meel kooban oo lagu badan yahay; inta badan kiisaska, toogteyaasha firfircoon waxay adeegsadaan hub (hubab) xabadda ka dhacdo mana jiro sasaan ama hab ay ku xushaan dhibaneyaashooda.

- Dhibaneyaasha waxaa loo xushaa si aan kala sooc lahayn*
- Marka dhacdada aan la saadaalin karin kaddibna dhakhso isu badbadasha*
- In aad ogaatid waxa la sameeyo waxay badbaadin kartaa nafta*

DHACDOOYINKA TOOGTAHA FIRFIRCOON

Marka Toogtaha Firfircoon ku sugan yahay meel kuu dhaw, waa in aad maskax ahaan iyo jir ahaan diyaar u ahaatid in aad xaaladda wax ka qabatid.



Waxaa kuu banaan saddax fursad:

1 OROD

- Maskaxda ku haay jid iyo qorshe aad ku baxsatid. Gadaal ku dhaaf alaabta aad leedahay
- Baxso xattaa haddii dadka kale aysan raali ku noqonin in ay ku soo raacaan
- Ku kaalmee dadka kale in ay baxsadaan, haddii ay suurto gal tahay
- Ha iskudayin in aad dhaqaajisid dadka dhaawacan
- Ka ilaali dadka kale in ay soo galaan goobta
- Meesha laga yaabo in uu joogo toogtaha firfircoon
- Ha la arko gacmahaada
- Wac 911 marka aad nabad qabtid

2 DHUUMO

- Ku dhuumo meel uusan kaa arki karin toogtaha.
- Xer albaabka ama wax ku dadab meesha laga soo galo meesha aad ku dhuumatay.
- Aamusi telefoonkaada gacanta (kana mid ah qaabka gariirka) adiga oo aamusa

3 DAGAALAN

- Dagaalan sida tallada ugu dambeyso iyo marka naftaada ku jirto halis degdeg ah
- Iskuday in aad itaal darreysid toogtaha
- Ku dhaqaaq in aad jir ahaan si xooggan u weerartid ilaa inta suurto gal ka ah
- Hub ka samayso waxa aad heli kartid ama waxyaabo ku tuur toogtaha firfircoon
- Xoogga saar talaabadaha aad qaadid waxaa ku xeran naftaada

Saraakiisha kowaad ee yimaada goobta ma istaagi doonaan si ay u kaalmeyaan dadka dhaawacan. Filo in kooxaha badbaadinta ku soo xigi doonaan saraakiisha hore. Kooxahaan badbaadinta waxay daweyn doonaan iyo waxay qaadi doonaan dadka dhaawacan.

Kaddib marka aad tagtid meel ammaan ah, waxay u badan tahay in hirgelinta sharciga ay meeshaas kugu sii hayaan ilaa ay ka kantaroolaan xaaladda, kaddibna la aqoonsado dhamaan marqaatiyada lana weydiyo su'aalo. Ha ka tagin goobta ilaa madaxda hirgelinta sharciga ku faraan in aad sidaan sameysid.